



Australian Government
Department of Home Affairs



Xannaanada carruurta ee barnaamijka Ingiriiska ee Dadka waaweyn ee Soo galootiga ah (Adult Migrant English Program)

Ma u baahan tahay xannaano carruureed si aad u timaado fasalada Adult Migrant English Program (AMEP)? Markaad ku jirto fasalka AMEP , waxaad u helaysaa xannaadada carruurta oo bilaash ah carruurtaada ka yar da'da dugsig.

Adeeg bixiyahaaga AMEP ayaa iskudeyi doona inuu kuu balamiyo xannaano u jirta 30 daqiiqo gurigaaga ama fasalka AMEP . Tani waxaa laga yaabaa inaysan had iyo jeer suurtoagal ahayn. Adeeg bixiyaha AMEP ayaa sameyn doona dadaalkooda ugu fiican si ay kuugu helaan tasiilaadka xannaanada carruurta ee kuugu dhow.

Adeeg bixiyayaasha AMEP ayaa ballamin doona xannaanada carruurta oo iskumar noqoneysa bilowga koorsadaada AMEP. Waxay sidoo kale iskudeyi doonaan kuu xafidaan xannaanada carruurta maalmaha ee fasalka dhiganeyso. Marmarka qaarkood tan waxaa laga yaabaa inaysan suurtoagal ahayn maadaama boosaska xannaanada carruurta ay had jeer xaddidan yihiin oo baahidooduna aad u sareeyso. Marmarka qaarkood, waxaa laga yaabaa inaan boosasba la helin islamarkiiba ama waxaa laga yaabaa in lagu siiyo meelayn xannaano carruureed qaby ah intaad sugaysid in maalmo dheeraad ah laga helayo.

Xannaanada carruurta oo bilaashna ah waxaa la bixinayaa oo kaliya intaad dhiganeyso fasalka AMEP. Looma helayo nashaadka ka baxsan wakhtiyada fasalka AMEP . markaad an imaneynaynin fasalka AMEP , ama haddii aad dhammeysay fasalkaaga, waa inaad balansataa xannaanadaada carruurta adigu. Haddii carruurtaada ama ilmahaagu uusan tegaynin xannaano ilaa wakhti , waa muhiim inaad wargeliso adeeg bixiyaha AMEP . Tani waa si wixii hore loo balamiyey carruurtaada in wax laga bedelo.

Haddii aad ka gafto fasalo badan oo ah AMEP , adeeg bixiyaha waxaa laga yaabaa inuu kansalo booskaaga xannaanada carruurta. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad ku soo noqoto AMEP, waxaad mar labaad dib u helaysaa xannaanada carruurta oo bilaash ah. Waxaa laga yaabaa si kastaba ha ahaatee, inaad u baahato inaad sugto booska xannaanada carruurta inuu soo helo mar labaad.

Marka la qiimeynayo baahidaada xannaanada carruurta, adeeg bixiyahaaga AMEP waxaa laga yaabaa inuu ku siiyo fursado kala duwan si aad waxbarashadaada ugu bilowdo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Tusaale, waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo:

- wax ka baro xarunta bulshada oo leh tasiilaadka xannaanada carruurta
- safar in ka badan intii aad jeclaan lahayd
- wax ka baro macalim ka guriga ama fogaan wax ku barashada ilaa laga helo booska xannaanada carruurta.

Haddii ballanta xannaanada carruurta baahidaada fulineynin ,waa inaad taas kala hadashaa adeeg bixiyahaaga AMEP .

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xannaanada carruurta, fadlan la hadal adeeg bixiyahaaga AMEP.